Sida Loogu Diyaargaroobo Booqashadaada

LACAG-BIXINTA

Fadlan ha ku dirin lacag-bixinta codsiga onlaynka ee u horreeya. Warqadda xaqiijintaada ee aad heshid markii booqashadaada la diiwaangaliyo way laba jabbaarantaa qaansheeg ahaan oo waxayna wadataa tilmaamaha lacag-bixinta. Lacag-bixinta waxa la doorbidaa ka hor taariikhda dalxiiskaaga laakiin shardi ma aha. Fadlan **HA** la imaanin lacag-bixintaada taariikhda dalxiiska. Fadlan ku bixi **ka hor ama kadib** booqashadaada jeeg ama ciridhit kaadh sida ku qoran tilmaamaha warqadda/qaansheegta xaqiijintaada.

Qidmada barnaamijyada la hago ama is-haga waa qiimo siman kooxdii ah (1-35 arday) oo ay ku jiraan ardayda, macallimiinta iyo oggolaanshaha kormeeraha. Qidmada Art Goes to School waa qiimo siman fasalkiiba (1-35 arday). Qidmooyinka waxaa lagu muujiyaa foomamka codsiga onlaynka ah.

Dugsiyada boqolkiiba 40 ama wax badan ardaydoodu helaan barnaamijka qadada la kabay waxay dalban karaan **dhismista qidmada boqolkiiba 50 ee booqashooyinka la hago iyo is-haga**ee lagu tago mid ka mid ah saddexda goobood ee SAM ama Art Goes to School. **Lacag-celinta qeybta ah ee baska** ayaa sidoo kale la heli karaa (fiiri bogga saddexaad).

XEERKA BURINTA IYO LACAG-CELINTA

Codsiyada joojinta waa in lagu sameeyaa qoraal muddo aan ka yareyn laba isbuuc ama toban maalin-shaqo ka hor booqashadaada. Fadlan iimeyl ugu soo dir codsigaaga schooltours@seattleartmuseum.org. Haddii burinta la sameeyo ugu yaraan laba isbuuc ama toban maalin-shaqo ka hor taariikhda dalxiiska, lacag-celin buuxdo ayaa la oggol yahay ama lacagbixinta waxa dib loo dalban karaa dalxiis walba oo dib loo muddeeyo. Lacag-bixinta lagu sameeyay kiridhit kaar waxaa si toos ah loogu celinayaa isla kaarka. Lacag-celinada jeegaga ama lacag-bixinta kaashka waxa lagu sameynayaa jeeg ka yimaad SAM kuna socda cidda ay dugsigu u xilsaartay. Ma jiraan lacag-celino la bixinayo haddii joojinta lagu sameeyo gudaha laba isbuuc ama toban maalin-shaqo ee taariikhda dalxiiska.

ISKU DIYAARINTA BOOQASHADAADA

Haddii aad diiwaangalisid dalxiiska la hago, hagaha matxaf ama jardiino (tilmaame) ayaa kula soo xiriirayo qiyaastii hal isbuuc ka hor dalxiiskaaga si loo xaqiijiyo boos-celintaada oo ka jawaaba su'aalo walba oo laga yaabo inaad qabtid.
Fadlan ka fogow siinta ardayda layliyo si ay dhammaystiraan inta lagu jiro barnaamijyada la hago. Waaya-aragnimadaan waa isdhexgal oo waxay u baahan tahay wadahadal dhex-mara hagayaasha iyo ardayda.

Wixiikhayraad lagu xoojinayo booqashada fasalkaaga ee matxafka, booqo Xarunta Khayraadka Macallinka Wycoff ama sahami aruurinta onlaynka SAM, halkaas oo aad ka ogaan kartid sheeyada la arkayo oo ku dhageysato hagayaasha dhageysiga ee aruurinta SAM iyo bandhigyo gaar ah oo si toos ah uga imaanayo websaytka SAM.

XAJMIGA KOOXDA IYO KORMEERAYAASHA

Fasal kaliya wuxuu u dhaxayn karaa hal ilaa shan iyo soddon arday. Ugu yaraan hal kormeere ayaa looga baahanyahay lix arday oo walba ee fasalada K-2 iyo hal kormeere ee toban arday oo walba ee fasalada 3-12. **Waxaad keensan kartaa 2-3 kormeerayaal dheeraad ah- laakiin maya wax ka badn intan.** Kormeerayaal walba oo dheeraad ah waxay u baahnaan doonaan inay ku bixiyaan lacagta tikidhadooda Xafiiska Oggolaanshaha. Kormeerayaasha waxaa laga filayaa inay fududeeyaan ka qeybgalka ardayda ee waayaaragnimada waxbarashada sidoo kale maamulidda edebta ardayda ee muddada booqashada fasalka ee matxafka ama jardiinada. Ardayda waa inay la joogaan kormeerayaasha marwalba.

GOOBAHA QADADA CABBAYSAN

Suuqa Hoose ee SAM

Kooxuhu waxay ku cuni karaan qadooyinka bacda jaranjarooyinka Art Ladder ama bannaanka jaranjarooyinka Jidka Jaamacadda. Meelahan lama dammaanad qaadin, marka waxaan ku talineynaa inaad qorsheysid goobo kale oo qadada lagu cuno.

Matxafka Fanka Seattle Asian

Volunteer Park waa meel aad ugu fiican cuntaynta. Haddii uu roob jiro, kooxuhu waxa laga yaabaa inay awood u yeeshaan inay ku qadeeyaan Qolka Alvord Board. Fadlan weydii in Xafiiska Tikid goynta haddii meeshan la heli karo.
Meesha lama dammaanad qaadin, marka waxaan kugu la talineynaa inaad qorsheysid goobo kale oo aad qadada ku cuntid.

Jardiinada Farshaxanka Olympic

Jardiinada Farshaxanka Olympic waa meel aad ugu fiican qadada banaanka. Haddii uu jiro roob yar, waxaan ku talineynaa inaad ku cuntid bannaanka waqooyiga Pavilion Terrace ee saqafyada hoostooda. Gudaha oo xaddidan waxaa la heli karaa cimilada qabowga daran. Fadlan weydii Xafiiska Macluumaadka jardiinada. Kormeerayaashow, fadlan ku kormeera ardayda agagaarka rakibista farshaxanka ee PACCAR Pavilion.

IMAANSHAHA

Suuqa Hoose ee SAM

Hagayaasha matxafku waxay kula kulmi kooxaha leh dalxiisyada la hago waqtigooda dalxiiska la muddeeyey **Waddada Koowaad albaabka Jidka Jaamacaddana *Hammering Man.*** Kooxaha imaanaya ka hor furitaanka matxafka waa inay bannaanka ku sugaan. Hagayaashu waxay u tilmaami ardayda inay dhigaan dhammaan boorsooyinka dhabarka, qadooyinka iyo jaakadaha sanduuqayada dugsiga ee la siiyay. Macallimiinta iyo kormeerayaashu waxay eegi karaan in jaakadaha iyo boorsooyinka ka weyn 11X15 inji lagu riday boorsada jaakada.

Kooxaha dugsiga ee si iskood ah u booqanayo matxafka (booqashooyinka is-haga, ama adigu is-wad) waa inay ka galaan SAM **waddada Koowaad albaabka Wadada Jaamacaddana *Hammering Man* sidoo kale.** Ku rida dhammaan boorsooyinka ardayda, qadooyinka iyo jaakadaha sanduuqyada dugsiga ee yaala dhinacyada albaabka. Macalimiinta iyo kormeerayaashu waxay eegin karaan jaakadaha iyo boorsooyinka ka weyn 11X15 injis in la geeyo Qolka Jaakadaha ee ka dambeeyo Xafiiska Macluumaadka ee albaabka Koowaad iyo Union St. Kadib markii qof walba dhigo boorsooyinkooda/qadooyinka/jaakadaha, kooxuhu waxay si toos ah ugu sii socon karaan jaranjarooyinka socda ee tagaya bandhigga.

Matxafka Fanka Seattle Asian

Hagayaasha matxafka waxay kula kulmi kooxo dalxiisyada la hago waqtigooda dalxiiska la muddeeyey albaabka matxafka. Kooxaha imaanaya ka hor furitaanka matxafka waa inay bannaanka ku sugaan.

Kooxaha dugsiga ee ku booqanaya matxafka iqtiyaarkooda (booqshooyinka is-hagista) waa inay iska xaadiriyaan Xafiiska Oggolaanshaha.

Jardiinada Farshaxanka Olympic

Hagayaasha matxafka (jaheeyayaasha) waxay kula kulmi kooxaha dalxiisyada la hago waqtigooda dalxiiska la muddeeyey albaabka PACCAR Pavilion. Kooxaha imaanaya ka hor furitaanka PACCAR Pavilion waa inay bannaanka ku sugaan.

Kooxaha dugsiga ee ku booqanaya jardiinada iqtiyaarkooda (booqshooyinka is-hagista) waa inay iska xaadiriyaan Xafiiska Macluumaadka.

GAADIIDKA BASKA DUGSIGA IYO GAARIGA

Suuqa Hoose ee SAM

Ardayda waa in lagu dajiyaa oo laga qaadaa aagga rarida baska ee southbound Waddada Labaad ee Jidka Jaamacadda. Baakinka baska lagama heli karo Suuqa Hoose ee SAM; hase yeeshee, baakin bas oo xaddidan ayaa laga heli karaa goobaha soo socda:

- **Alaskan Way:** Baakin bilaash ah 20 daqiiqo ayaa laga heli karaa dhinaca galbeed ee Alaskan Way, waqooyiga Seattle Aquarium.
- **Waddada Koowaad:** Baakin bas xaddidan oo bilaash ah ayaalaga heli karaa Waddada Koowaad inta u dhaxeyso Waddooyinka Atlantic iyo Massachusetts halka u dhow Safeco Field.

Matxafka Fanka Seattle Asian

Ardayda waa in lagu dajiyaa oo laga qaadaamatxafka hortiisa. Baakin bas oo bilaash ah ayaa laga heli karaa Volunteer Park. Meesha ugu wanaagsan ee baabuurka la dhigto waa waqooyiga matxafka ee jidka ku dhereran; hase yeeshee, basasku kuma eka aaggaas. Baakinka gaariga oo bilaash ah ayaa sidoo kale laga heli karaa Volunteer Park. Waxaa jiro meelo badan matxafka hortiisa ama dhinacyada jidadka.

Jardiinada Farshaxanka Olympic

Ardayda waa in lagu dajiyaa oo laga qaadaa PACCAR Pavilion hortiisa ee Jidka Galbeed waqooyiga Jidka Broad. Baakinka baska dugsiga waxaa laga heli karaa aagagga cabbiran ee jidadka koonfurta baakinka iyo Alaskan Way dhinaca waqooyiga Seattle Aquarium. Baakinka gaariga ee lacagta ah ayaa laga heli karaa garaajka baakinka ee ka hooseeyo PACCAR Pavilion iyo jidadka dariska ah.

LACAG-CELINTA BASKA DUGSIGA

Lacag-celin qeyb ah ee qarashaadka gaadiidka baska ee wax kamid ah saddexda goobood ee SAM ayaa lagu heli karaa si ku saleysan qof hor imaadaa, ayaa loo hor adeegaa ee dugsiyada oo boqolkiiba 40 ama ka badan ardaydiisa ay kujiraan barnaamijka qadada la kabo. Ku tilmaan inaad danaynayso lacag-celinta baska ee qeybta ahaanta ahfoomka diiwaangalintaada oo buuxi foomka lacag-celinta qarashaadka baska booqashaada kadib.

GAADIIDKA DADWAYNAHA

Wixii macluumaad faahfaahsan ah, kala xiriir Metro Transit 206.553.3000.

Suuqa Hoose ee SAM

Basas badan oo Metro ah waxay ka shaqeeyaan Suuqa Hoose ee SAM ee dhinaca Waddada Koowaad. Macluumaadka rakaabka oo faahfaahsan waxaa laga heli karaa adiga oo ka soo wacayo Metro 206.553.3000, Sound Transit ee 206.398.5000 ama Community Transit ee 206.353.7433.

Matxafka Fanka Seattle Asian

Baska Metro #10 wuxuu joogsadaa dhinaca Waddada 15aad gadaasha matxafka. Raac mid ka mid waddooyinka lugta oo oo sii maraya Volunteer Park tagana matxafka.

Jardiinada Farshaxanka Olympic

Basaska Metro #1, 2, 13, 15, 18, 21, 22 iyo 56 waxay joogsadaan dhinaca Waddada Kooowaad kaliya hal bolog ka ah bariga baakinka Jidka Broad. Adeega basaska kale Waddada Labaad.

MEESHA KEYDKA

Haddii ay suurtogal tahay, uga tag sheeyada sida qadooyinka ama boorsooyinka dhabarka gawaarida. Sanduuqyada keydka kooxda dugsiga oo xaddidan ayaa laga heli karaa Suuqa Hoose ee SAM ee albaabka First iyoJaamacadda oo loogu talogalay kooxaha dalxiiisyada la hagayo iyo albaabka First iyo Union oo loogu talogalay kooxaha ku booqanayo matxafka iqtiyaarkooda (kooxdaha is-hagaya). Macallimiinta iyo kormeerayaasha booqanayo Suuqa Hoose ee SAM waxay dhigi karaan boorsooyinka ka weyn 11X15" iyo jaakadaha ee Qolka Jaakadaha ee ku yaalo gadaasha Xafiiska Macluumaadka. Sanduuqyada keydka kooxda dugsiga oo xaddidan ayaa sidoo kale laga heli karaa Jardiinada Farshaxanka Olympic iyo Matxafka Fanka Seattle Asian xiliga aad ka codsatid Xafiiska Macluumaadka.

XEERARKA BADBAADADA MATXAFKA

- Fadlan ha taaban wax ka mid ah shaqooyinka fanka.
- Cuntada, cabitaanada iyo xanjada looma oggolo bandhigyada.
- Boorsooyinka, boorsada haweenka iyo boorsada dhabarka ee ka weyn 11 x 15 injis waa in la qabto ama looga tagaa sanduuqa keydka kooxda dugsiga. Ardayda waa inay u soo qaataan sheeyada qiimaha leh sida boorsada lacagta iyo taleefanada gacanta bandhigyada ama dhulalka jardiinada. Suuqa Hoose ee SAM, macallimiinta iyo kormeerayaasha waxay dhigi karaan boorsooyinkooda Qolka Jaakadaha ee u dhow albaabka First and Union.
- Ku sawirista warbaahin qallalan (qalin-qori, qali-qoriga midabeysan, tabaashiir) waa loo oggolyahay bandhigyada matxafka. Fadlan la imow agabkaaga gaarka ah.
- SAM ma oggolaato sawir qaadista aan iftiinka lahayn aagagga inta u badan, markii laga reebo bandhigyada gaarka ah iyo markii aan lagu tilmaamin astaanta sawirka ah.
- Kormeerayaasha waa inay ka qeybgalaan kooxyadooda ardayda marwalba oo masuul ka noqdaan labadaba edbintooda iyo fududeynta waaya-aragnimo barasho oo raaxo iyo ka qeybgal u leh dhammaan.

CIMILADA JARDIINADA FARSHAXANKA OLYMPIC

Waxaan rajeyneynaa inaad ka heli doontid maalin qurux badan Seattle booqashadaada! Hase yeeshee, maadaama aan ku noolnahay Waqooyiga galbeed, waan ognahay dhammaanteen nooc walba oo cimilo ah ay suurtogal tahay. Fadlan u diyaari ardaydaada dhammaan xaaladaha. Waxaa lagu taliayaa in arday walba la imaado dallad iyo/ama jaakada roobka. Waxaa kaliya oo aan u burin doonaa barnaamijka dugsiga xaalado oo cimilo daran. Haddii SAM buriso dalxiis ama aqoon is weedaarsiga fanka, waa lagu soo ogeysiin doonaa oo waxaan dib ugu muddayn doonaa kooxdaada maalin kale iyada oo aanay jirin lacag ganaax ah oo aad bixisaa. Soo wac Isu-duwaha Dalxiiska 206.654.3123 walaacyada cimilada la xiriiro.

TUKAANADA MATAXFKA

Kaliya shan arday oo uu la jiro kormeere ayaa booqan karo goobta TUKAAN SAMhalkii marba.

XAALADAHA GURMADKA

Inkastoo aananu saadaalin wax xaalado gurmad ahoo dhacaya inta lagu jiro booqashadaada, waxaa marwalba wanaagsan in la diyaargaroobo. Haddii xaalad gurmad caafimaad ama xaalado gurmad oo kale dhacaan, isla markiiba la xiriir **Sarkaalka Adeegyada Martiga {Amniga)** ugu dhow ee laga heli karo caawin.

ISU-DUWAHA DALXIISKA

Haddii aad u baahantahay inaad kala soo xiriirtid matxafka wax ku saabsan booqashadaada, fadlan kala xiriir isu-duwaha dalxiiska 206.654.3123 ama schooltours@seattleartmuseum.org.